



Barmaanijka Tijaabda ah ee Dhiirigalinta Taraagyada Korontada ah ee Seattle



Seattle waxay haysaa barmaanij cusub oo la yiraahdo Barmaanijka Tijaabda ah ee Dhiirigalinta Taraagyada Korontada ah. Waxay dhiirigelisaa isticmaalka baabuurta xamuulka ah ee korontada ku shaqeeya waxayna siisaa lacag celin baabuurta koronto ee cusub ee laga isticmaalo Port of Seattle. Waxay taageertaa tamarta nadiifka ah waxayna yareysaa qiiqa hawada.

Dhiirigelinta ayaa bixin doonta 40% qiimaha baabuur koronto ah, ilaa ugu badnaan \$180,000 baabuurkiiba.

Waxkaqabashada Waxyeelada Caafimaad iyo Wasakhowda Cimilada

Hay'adaha Bulshada ee Ku Yaala Duwamish Valley ee Seattle waxay riixayaan baabuurta xamuulka ah ee korontada ku shaqeysa si ay u yareeyaan wasakhowga ka yimaada warshadaha, baabuurta naaftada ku shaqeeya, iyo qiiqa gaadiidka. Daraasaduhu waxay muujinayaan in xaafadaha u dhow dekedda, oo ay ku jiraan Beacon Hill, Georgetown, iyo South Park, ay leeyihiin heerar sare oo wasakhowga hawada iyo heerka neefta carruurta marka loo eego meelaha kale ee Seattle ku yaala.



Taraagyadee?

Dekedu shaqadeedu waxay ku tiirsan tahay 4,000 oo taraak oo naafto ku shaqeeya Si'ay ugu adeegaan Dekedaha Seattle iyo Tacoma.

Taraakyada ku shaqeeya naaftada waxay sababaan qiiq aaga. Matooradoodu waxay ku sii daayaan wasakhaha waxyeelada leh xaafadaha ku hareeraysan, magaalada hoose ee Seattle, iyo Duwamish Valley.

Seattle waxay diirada saareysaa dhimista qiiqa naaftada si loogu faa'iideyo cadaalada deegaan bulshooyinka.

GOOLASHA SEATTLE SI LAGU YAREEYO QIIQA GAADIIDKA

 <p>30%</p> <p>In Eber La Gaarsiyo Sanadka 2030</p>	<p>↓ 82%</p> <p>Yarenta Qiiqa Sanadka 2030</p>	 <p>2050</p> <p>In Kaarboonka laga dhigo Dhexdhexaad sanadka 2050</p>
---	---	---



Sida loo codsado

Hoos waa nidaamka codsiga. Wixii xog dheeraada, fadlan eeg "**Hagaheena Sida Loo Codsado.**" Wixii Su'aad Dheeraada, La Xiriir OSE_Trucks@seattle.gov wixii taageera ah



Talaabada 1: Dulmar/Dib-u-eeg Shuruudaha U Qalmitaanka Barmaanjika

Eeg haddii aad u qalanto adiga oo dib u eegaya shuruudaha u-qalmitaanka ee Hagaha Barnaamijka ama bog-khadka.

Talaabada 2: Diyaari dukumintiyada iyo xogta loo baahan yahay

Uruuri dhamaan dukumiintiyada iyo xogta.

Talaabada 3: Booqo Foomka Codsiga

Booqo bog-khadka rasmiga ah ee Barnaamijka Tijaabada Dhiirigelinta Gawaarida Korontada.

Talabada 4: Dhameystir Codsiga Foomka

Ku buuxi foomka xog rasmi ah oo buuxda. Bixi dhamaan dukumintiga iyo macluumaadka loo baahan yahay.

Talaabada 5: Gudbi Codsiga

Marka aad dib u eegto codsigaaga, ku soo gudbi foomka bog-khadka lifaaqyadana ku iimeel-gareeh OSE_Trucks@seattle.gov.

Talaabada 6: Eegista iyo Qiimeynta Codsiga

Kadib markaad gudbisid, codsiyada ayaa la eegayaa oo la qiimeynayaa. Waxaa lagula soo sheegi doonaa xaalada ka dib marka wakhtiga codsigu dhamaado.

Talaabada 7: Talaabooyinka Xiga iyo Taakulada

If your application is successful, you will receive instructions on the next steps to proceed with the program, including any additional requirements or documentation needed. If your application is not successful, we may contact you about future funding opportunities.

**Xiiseynayssa inaad codsato mustaqbalka?
Buuxi foomkeena danaynta!**